

 Kismayo – 07 Luuliyo 2025

 **WARBIXIN: BOOQASHADA XABSIGA DHEXE EE KISMAAYO**

 Goobta: Xabsiga Dhexe ee Degmada Kismaayo

 Xafiiska: Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud – Dowladda Jubaland

 Sida uu qabo Qodobka 59(2)(c) ee Dastuurka KMG ah ee Jubaland, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu leeyahay masuuliyadda kormeerka xabsiyada iyo goobaha dhaqan celinta si loo xaqiijiyo ilaalinta xuquuqda maxaabiista iyo ku dhaqanka cadaaladda.

 Maanta, qaar ka mid ah Ku-xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud iyo hawlwadeeno ka tirsan xafiiska ayaa booqday Xabsiga Dhexe ee Kismaayo, iyagoo:

 Kormeeray xaaladda guud ee xabsiga

 Si gaar ah ula kulmay 31 maxbuus oo dacwadahooda ay yaallaan maxkamadda ama ay baaristoodu socoto

 Sharaxay marxaladaha sharci ee kiiska kasta

 La yeeshay kulan saraakiisha Asluubta si kor loogu qaado ilaalinta xuquuqda maxaabiista

 Ujeedada Booqashada:

 La-socodka xaaladda maxaabiista

 Wacyigelin sharci iyo talo-bixin

 Xoojinta wada shaqeynta hay'adaha cadaaladda iyo Ciidanka Asluubta.

Gaba bago:

Booqashadan waxay qeyb ka tahay dadaallada joogtada ah ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jubaland uu ku xaqiijinayo cadaaladda, ilaalinta xuquuqda maxaabiista, iyo kormeerka nidaamka xabsiyada si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka dalka.

 Kismaayo | 07 Luuliyo 2025

Maanta waxaa xarunta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Dowladda Jubaland ka qabsoomay kulan muhiim ah oo looga hadlayay xaalada maxaabiista ku xiran xabsiyada Dowladda Jubaland, gaar ahaan kuwa ku sugan magaalada Kismaayo.

Kulanka waxaa soo qabanqaabiyay Xeer-ilaaliyaha Guud Avv. Nuuradiin Maxamed Khalif, waxaana ka soo qeybgalay:

 Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida

 Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Jubada Hoose

 Guddoomiyaha Maxkamadda Darajada 1aad ee Degmada Kismaayo

 Agaasimaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Jubaland

 Agaasimaha Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Dowladda Jubaland

Kulankan ayaa qeyb ka ah dadaallada joogtada ah ee lagu horumarinayo hufnaanta, ilaalinta xuquuqda maxaabiista, iyo tayaynta nidaamka cadaaladda ee Jubaland.

Xafiiska Warfaafinta iyo Xiriirka Dadweynaha

 Email: communication@agojubaland.so

 Website: www.agojubaland.so